HERITAGE
INSTITUTE

POLICY
BRIEF
Dec 2023

Kor u Qaadista isku Fillaanshaha Dakhliga Gudaha, si Soomaaliya uga Maaranto ku Tiirsanaanta Taageero-miisaaniyadeedka Shisheeyaha

Dr. Uweys Cabdullaahi Cali

Tusmada

1 Hordhac 3

2 Dakhliga Gudaha ee Soomaaliya 5

3 Casharrada Dakhli Abuurista Gudaha ee Dalal kale laga Baran karo 9

4 Dibuhabeynta Dakhliga ee ay Soomaaliya Dhowaan samaysay 11

5 Caqabadaha ku Xeeran Kor u Qaadista Dakhliga Gudaha 12

6 Waaritaanka Maaliyadda iyo Saamaynta ay ku Leedahay Teegeero-miisaaniyadeedka Shisheeyuhu 15

7 Talabixinno Siyaasadeed 17

1. Hordhac

Dakhliga guduhu waa isha ugu muhiimsan ee uu dal ku maalgaliyo horumarkiisa. Soomaaliya, oo ah waddan si tartiib tartiib ah uga soo kabanaya tobannaan sano oo xasilooni darro ah, waxa ay dardargalin kartaa soo kabashadeeda dhaqaale, haddii ay kor u qaaddo dakhligeeda gudaha, xooggana ay saarto addeegyada aasaasiga ah, sida waxbarashada, caafimaadka, tamarta iyo kaabayaasha dhaqaalaha. Arrimahaasi waxa ay ahmiyad u leeyihiin soo afjaridda saboolnimada ba'an iyo kor u qaadista koboca-dhaqaale ee loo dhan yahay.

Sannadkii 2012, Soomaaliya waxa ay qaadatay hannaan dowladnimo oo federaali ah, waxa aanay qabatay doorashadii ugu horreysay ee madaxweyne tan iyo markii ay dowladdu ka baxday ku meelgaadhnimada. Xasan Sheekh Maxamuud oo xubin ka ahaan jiray ururrada bulshada ayaa dalka madaxweyne ka noqday. 10-kii sano ee xigtay dalku waxa uu sameeyey dadaallo mug leh, kuwaas oo dib loogu soo yagleelayo, laguna qaabaynayo hay'adaha dhaqalaaha; iyada oo ay dowladda gacan siinayaan hay'ado caalami ahi, sida Bangiga Adduunka (WBG) iyo Sanduuqa Lacagta Adduunku (IMF).

> “Sanadkii 2020kii, Soomaaliya waxay gaadhay meel go'aan qaadasho u baahan si HIPC iyo Hay'adaha Maaliyadda ee Caalamiga ahi (IFIs) ay deynta uga cafiyaan si ay deeq bixiyayaasha uga hesho ilo dhaqaale oo cusub kuwaa oo isugu jira kabid miisaaniyadeed toos ah iyo mashaariic.2 Waxaa la filayaa in dalku uu helo deyn cafin dhammaystiran 13-ka Diisember 2023

Qorshahan dibuhabeynta dhaqaale, ayaa si weyn kor ugu qaaday dakhliga gudaha, kaas oo sannadkii 2021 gaadhay $229.6 malyuun, halka uu sannadkii 2014 ahaa $84.3 malyuun.[1] Sidaa awgeed, beesha caalamku, gaar ahaan WBG iyo IMF waxa ay u arkeen in guul laga gaadhay Soomaaliya, oo ay buuxisay shuruudihii deyn cafinta ee lagu xidhay waddamada saboolka ah ee deynta badan lagu leeyahay (HIPC). Tobankii sano ee u dambeeyey, waxa uu dakhliga gudaha ee sannadlaha ahi celcelis ahaan dakhliga guud ka ahaa 3%. Sanadkii 2020kii, Soomaaliya waxay gaadhay meel go'aan qaadasho u baahan si HIPC iyo Hay'adaha Maaliyadda ee Caalamiga ahi (IFIs) ay deynta uga cafiyaan si ay deeq bixiyayaasha uga hesho ilo dhaqaale oo cusub kuwaa oo isugu jira kabid miisaaniyadeed toos ah iyo mashaariic.[2] Waxaa la filayaa in dalku uu helo deyn cafin dhammaystiran 13-ka Diisember 2023.

Guulahaasi waxa ay saynsaabeen caqabado ay ka mid yihiin xiisado siyaasadeed oo aan dhammaad lahayn, khataro amni oo Al-Shabab ka imanaya, Covid-19 iyo isbedbeddel badan oo cimilada la xidhiidha, sida abaaro soo noqnoqda. Fakhriga iyo shaqo la'aanta, gaar ahaan kuwa dhallinyarada, ayaa weli sarreeya. Waxa kale oo si joogta ah u jira sinnaan darro iyo cunto yari. Si caqabadahan looga gudbo waxa lama huraan ah in la abaabulo miisaaniyad sannadeed ku tiirsan kheyraadka gudaha.

---

[1] Wasaaradda Maaliyadda.
[2] IMF, March 2020. Somalia: Enhanced Heavily Indebted Poor Countries (HIPC) Initiative – Decision Point. https://www.imf.org/en/Publications/CR/Issues/2020/03/26/Somalia-Enhanced-Heavily-Indebted-Poor-Countries-HIPC-Initiative-Decision-Point-Document-49290

> *In kasta oo dibuhabeyn lagu sameeyey dakhli ururinta, dakhliga gudaha ka soo baxaa waxa uu wax soo saarka guud ee dalka ka yahay 3.1%, taas oo macnaheedu yahay midka ugu hoseeya adduunka oo dhan*

Soomaaliya, waxa ay si weyn ugu tiirsan tahay deeqaha dibadda, welina kuma aanay guulaysan in ay gudaha dalka ka soo saarto dakhli ay ku bixiso addeegga bulshada. Sannadka 2023, 73% ka mid ah dakhliga dowladda dhexe waxa uu ka yimid deeq bixiyayaasha. Dakhligaas intiisa badani waxa ay ku baxdaa sugidda amniga iyo khidmadda maamulka.[3] In kasta oo dibuhabeyn lagu sameeyey dakhli ururinta, dakhliga gudaha ka soo baxaa waxa uu wax soo saarka guud ee dalka ka yahay 3.1%, taas oo macnaheedu yahay midka ugu hoseeya adduunka oo dhan.[4] Canshuur ururinta aadka u hoosaysaa waxa ay khatar ku tahay horumarka dhaqaalaha, maxaa yeelay dalku ma karayo in uu bixiyo addeegyada muhiimka ah, sida caafimaadka iyo waxbarashada iyo adeegyada guud ee kale ama uu u faragodo kaabayaasha dhaqaalaha ee daruuriga ah sida jidadka iyo xoogga korantada.

Ku tiirsanaanta taageerada dibadda ee xadhkaha goosatay, waxa ay hoosta ka xarriiqaysaa muhiimadda ay leedahay in la xoojiyo ururinta dakhliga gudaha, kaas oo u baahan in lagu ladho siyaasad hufan iyo maammul talasan. Soo saaridda dakhliga gudaha; iyada oo la ballaadhinayo canshuuraha, ayaa muhiim u ah horumarka dhaqaale ee dalka. Dhammaadka 2023, Soomaaliya waxa ay gaadhi doontaa heer laga cafiyo daymaha sida ku cad nidaamka HIPC, taas oo keeni doonta in la waayo dakhliga laga helo deeq bixiyayaasha. Arrintaasi waxa ay lagama maarmaan ka dhigaysaa in xoogga la saaro sidii kor loogu qaadi lahaa dakhliga gudaha.

Kolkaa waa in la fahmo caqabadaha ku gadaaman kor u qaadidda dakhliga gudaha, si looga gudbo ku tiirsanaanta deeqaha dibadda ka imanaya, taasina waxa ay dhaabadayn u tahay xoojinta dakhliga canshuuraha dowladda iyo in diiradda la saaro howlaha horumarineed ee hortabinta u leh dalka.

Qoraalkan koobani, waxa uu u kuurgalayaa inta ay le'eg yihiin canshuuraha ay ururiyaan dowladda dhexe iyo dowladaha xubnaha ka ahi; dibuhabeynta dakhliga gudaha ee ay dowladdu hore u samaysay; canshuuraha ay soo kordhin doonto; goldaloolooyinka dhanqaryeyn kara xoojinta dakhliga gudaha iyo sidii ay Soomaaliya ugu halgami lahayn helitaanka dakhli ku filan oo dalka gudihiisa ka yimid, si looga gudbo ku tiirsanaanta gargaarka dibadda, loona maalgaliyo horumarka dalka.

Waraaqdu waxa ay ku bilaabanaysaa qiimeynta waxqabad-maaliyadeedka dalka, iyada oo falanqaynaysa sida kor u qaadidda dakhliga guduhu uu fure ugu noqon karo ka hortagga ku tiirsanaanta deeqaha dibadda iyo sidii si buuxda tunka loogu ridan lahaa maalgalinta dibudhiska dalka iyo kor u qaadista koboca-dhaqaale ee loo dhan yahay.

---

[3] Budget appropriation act, 2023. Federal Government of Somalia.

[4] World Bank report, 2022. Somalia Economic Update: Investing in Social Protection to Boost Resilience for Economic Growth. https://documents1.worldbank.org/curated/en/099645010242215445/pdf/P17502402429f50e708a6408e3872dbb193.pdf

Qoraalku, waxa uu raadraaci doonaa dakhli ururinta gudaha ee guud iyo hababka canshuur qabashada ee laamaha kala duwan ee dowladda, sida dowladda dhexe, dowlad goboleedyada iyo dowladaha hoose. Waxa uu sii doocdoocinayaa caqabadaha ku gudban kor u qaadidda dakhliga gudaha, isaga oo siyaasiyiinta u soo jeedin doona talooyin wax-ku-ool ah, si loo xoojiyo helidda dakhli gudaha dalka laga dhaliyo.

Qoraalku, waxa uu si weyn u cuskanayaa xog oollin ah, oo 10-kii sano ee u dambeeyey la ururiyey iyo dibu-eegis warbixinno iyo dokumentiyo dowladeed oo ay soo saareen ururro maxalli ah iyo kuwo caalami ah. Cilmibaadhayaasha ayaa sida oo kale waraystay saraakiil ka tirsan Wasaaradda Maaliyadda iyo khubaro u dhuundaloosha arrimaha maaliyadda, si loo xoojiyo macluumaadka ay waraaqdani xambaarsan tahay.

2. Dakhliga Gudaha ee Soomaaliya

In kasta oo ay dowladda federaalka ah ee Soomaaliya dadaashay 10-kii sano ee la soo dhaafay, haddana Soomaaliya waxaa curyaamiyay dakhliga gudaha oo liita iyo xaddiga cashuuraha oo hooseeya. Guud ahaan dakhliga guduhu waa uu kordhayaa, laakiin weli kuma filna in uu dhiirrigaliyo nabadda, in la bixiyo adeegyada lagama maarmaanka u ah ummadda Soomaaliyeed iyo in dib loo unko hannaan horumarineed oo dhaqaale.

> “*Guud ahaan dakhliga guduhu waa uu kordhayaa, laakiin weli kuma filna in uu dhiirrigaliyo nabadda, in la bixiyo adeegyada lagama maarmaanka u ah ummadda Soomaaliyeed iyo in dib loo unko hannaan horumarineed oo dhaqaale*

Dakhliga dowladda Soomaaliya, waxa uu leeyahay saddex rukun oo kala ah canshuuraha, mid aan canshuur ahayn iyo deeqaha ka yimaadda deeq bixiyayaasha caalamiga ah. Ilo dakhli oo kala duwan in la abuuro ayaa muhiim u ah dowladda si ay u maalgaliso hawlaheeda, una bixiso adeegyada lagama maarmaanka u ah horumarinta dhaqaalaha. In kasta oo canshuur laga qaado ganacsiga caalamiga ah, haddana Soomaaliya waxa ay aad ugu tiirsan tahay deeqaha debedda, kuwaas oo miisaaniyadda sanadlaha ah ee dowladda ka noqonaya 70%.

Shaxanka 1-aad: Dhakhliga gudaha ka soo xarooda ee dhabta ah, 2018-2022 (malyuun oo doolar)

Description	2018	2019	2020	2021	2022
Domestic revenue	**180.2**	**229.7**	**211.2**	**229.4**	**263.1**
Income tax	8.6	11.7	16.2	15.8	18.7
Taxes on goods and services	30.0	36.0	32.3	38.0	47.0
Taxes on international trade	100.3	107.0	91.1	108.9	116.6
Non-tax revenue	41.3	75.0	71.7	66.8	80.9

Tixraac: Wasaraada Maaliyada, Dowladda Federaalka Soomaaliya

> *Dakhliga gudaha, sida canshuurta mushaaraadka laga jaro, canshuurta badeecada iyo adeegyada, canshuurta ganacsiga caalamiga ah iyo dakhliga aan canshuuraha ka iman ee kale, waxa uu 2018 ahaa $180.2 malyuun*

Sida ka muuqata Shaxanka 1aad, dakhliga gudaha ee DFS aad ayuu u kordhay shantii sano ee u dambeeyey. Dakhliga gudaha, sida canshuurta mushaaraadka laga jaro, canshuurta badeecada iyo adeegyada, canshuurta ganacsiga caalamiga ah iyo dakhliga aan canshuuraha ka iman ee kale, waxa uu 2018 ahaa $180.2 malyuun, halka uu 2022 ka ahaa $263.1 malyuun. Isha ugu muhiimsan ee kobacu waa dakhliga ka soo xerooday canshuurta ganacsiga caalamiga ah iyo midka badeecada iyo adeegyada, in kasta oo uu dakhliga aan canshuuraha ka iman qudhiisu labo jiifar kor u hayaamay. Canshuurta mushaaraadka laga jaro lafteedu way korodhay in kasta oo ay yar tahay, marka la barbardhigo kuwa kale. Dowladda dhexe waxa ay canshuurta ka ururisaa magaalo madaxda Muqdisho, halka ay dowlad goboleedyada iyo dowladaha hoose masuul ka yihiin canshuuraha gobollada kale.

Xisaabtaa aan kor ku xusnay waxa ay tusaysaa korodh togan oo ku dhacay dakhliga gudaha ee dowladda dhexe. Sidaas oo kale, korodhka canshuurta ganacsiga caalamiga ah iyo midka canshuurta badeecada iyo adeegyadu waxa ay calaamad u yihiin bullaalidda dhaqaalaha iyo ganacsiga. Tanaadka dakhliga aan canshuuraha ka iman waxa ay qudhiisu daliil u tahay in dadaalka dowladdu ay ku abuurayso ilo dhaqaale oo kala duwan uu soo fiicnaanayo, halka korodhka canshuurta laga jaro mushaaraadku uu tusayo in u hoggaansanaanta sharciyada canshuuruhu ay soo wanaagsanaanayaan.

Shaxanka 2aad: Inta uu Dakhliga Gudahu ka yahay boqollayda wax soo saarka guud ee dalka (GDP), 2018-2022

	Domestic revenue	Income and corporate taxes	Taxes on goods and services	Other taxes	Non-tax revenue	Taxes on international trade
2018	3.9	0.2	0.5	0.2	0.9	2.1
2019	3.5	0.2	0.4	0.2	1.2	1.6
2020	3.1	0.2	0.3	0.2	1	1.3
2021	3	0.2	0.3	0.2	0.9	1.4
2022	3.1	0.2	0.4	0.2	0.9	1.4

Tixraac: Xogta Bangiga Aduunka

Sida ku cad Shaxanka 2aad, xogtu waxa ay daaha ka qaadaysaa muddadii u dhexaysay 2018 iyo 2022, in aan wadarta saammiga dakhliga gudaha ee DFS marnaba dhaafin 3%, marka loo eego wax soo saarka guud ee dalka. Taa baddelkeeda, canshuuraha ganacsiga ayaa hoos ugu soo dhacay 1.4% 2022, halka ay hore uga ahaayeen 2.1% sannadkii 2018. Saammiga canshuuraha badeecada iyo adeegyada ayaa mar walba ka yaraa 1%.

> *Fadhiidnimada dakhliga isku dhafka ah ee dowladda dhexe uga soo xerooda gudaha oo ah 3%, ayaa muujinaya awood darrada iyo sida ay dowladdu ugu liidato wax soo saarka dakhliga*

Isbeddelladan ayaa muujinaya in uu dalku wajahayo caqabado canshuur ururineed oo joogto ah, iyada oo dakhliga soo xeroodaa hooseeyo. Fadhiidnimada dakhliga isku dhafka ah ee dowladda dhexe uga soo xerooda gudaha oo ah 3%, ayaa muujinaya awood darrada iyo sida ay dowladdu ugu liidato wax soo saarka dakhliga. Hoos u dhaca canshuuraha ganacsiga iyo canshuuraha badeecada iyo adeegyada oo markasta hooseeya ayaa sii muujinaya caqabadaha ku gudban dakhli ururinta.

Jaantuska 1aad: Dakhliga canshuuraha, 2021



Tixraac: Xogta Bangiga Aduunka

> *Dakhliga canshuurta ee Soomaaliya aad ayuu uga yar yahay midka dhammaan waddamada Jaantuska koowaad ku xusan, kuwaa oo aan qudhoodu gaadhin halbeegga ugu hooseeya ee dakhliga canshuurta, si ay u hiigsadaan yoolkooda horumarka, una oogaan kobac dhaqaale oo loo dhan yahay*

Jaantuska 1aad, waxa uu tusayaa heerka dadaalka canshuur ururinta Soomaaliya, oo la barbardhigay waddamo ka tirsan Saxare-xigeenka Afrika, kuwaas oo ku sugan xaalad nugul iyo xasarado colaadeed iyo sida oo kale, isbarbardhigga dalalka dariska. Dakhliga canshuurta ee Soomaaliya aad ayuu uga yar yahay midka dhammaan waddamada Jaantuska koowaad ku xusan, kuwaa oo aan qudhoodu gaadhin halbeegga ugu hooseeya ee dakhliga canshuurta, si ay u hiigsadaan yoolkooda horumarka, una oogaan kobac dhaqaale oo loo dhan yahay. Saammiga canshuurta iyo wax soo saarka guud ee dalka Soomaaliya waxa uu 2021 ahaa 2.1%, kaas oo ka wada hooseeya waddamada qaaradda Afrika oo dhan, sida Sierra Leone (12.5), Kenya (13.2), Chad (14.4), iyo Liberia (16.7) Waddamada kuwan ka horumarsan, sida Koonfur Afrika, Lesotho, Mauritius, iyo Senegal, dakhliga canshuurahoodu wuu ka badan yahay saammiga wax soo saarka guud ee dalka oo ah 15%, kaas oo muhiim u ah maalgalinta badeecada, adeegyada iyo kobcinta dhaqaalaha.

> “
> *Waddamada Soomaaliya oo kale ah, ee ay liidato awoodda dhaqangalinta iyo iskudubbaridka canshuuraha ka dhaxeeya dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyadu, waxa curyaamiya isku xidhnaan la’aanta canshuur ururinta*

Dakhliga canshuuruhu siyaalo kala duwan ayuu uga muuqdaa jaadadka dhaqaalaha, iyada oo ay dal kasta saameeyaan xaalado u gaar ah oo la xiriira arrimo dhaqan-dhaqaale iyo kuwo siyaasadeed. Waddamada Afrikaanka ahi waxa ay caqabado waaweyn kala kulmaan ganacsiyo ay adag tahay in la canshuuro, sida meheradaha yaryar, beeralayda jilicsan iyo ganacsiga aan rasmiga ahayn. Taas waxaa sii ladhan musuqmaasuqa iyo ku takrifalka hantida dadweynaha. Waddamada Soomaaliya oo kale ah, ee ay liidato awoodda dhaqangalinta iyo iskudubbaridka canshuuraha ka dhaxeeya dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyadu, waxa curyaamiya isku xidhnaan la’aanta canshuur ururinta, taasina waxa ay sii xannibtaa koboca iskufillaanshaha dakhliga gudaha.

Noocyada Dakhliga Maammul Goboleedyada

In kasta oo aanu jirin qorshe midaysan oo canshuur qaadiseed, dowlad goboleedyadu waxa ay canshuurta u qaadaan si la mid ah sida ay dowladda dhexe u qaaddo. Warbixin uu dhowaan soo saaray Xisaabiyaha Guud, ayaa sheegtay in dakhliga canshuuraha ee dowlad goboleedyadu uu kala duwan yahay. Bishii Abriil 2023, Puntland waxa ay soo xeraysay $5.9 malyuun, halka ay Jubbaland ka soo xeraysay $2.0 malyuun, Koonfur Galbeedna soo xeraysay $300,000, oo kaliya.[5]

Puntland iyo Jubbaland ayaa si weyn ugu tiirsan canshuuraha dekadda Boosaaso iyo tan Kismaanyo, halkaas oo ay uga soo xerooto qayb weyn oo ka mid ah dakhligoodu. Galmudug, Hirshabeelle iyo Koonfur Galbeed dekado ma laha, sidaa awgeed, waxa ay qaadaan canshuur ka yar ta ay dowlad goboleedyada kale qaadaan.

Jaantuska 2aad: Dakhliga canshuuraha dowlad goboleedyada, Abriil 2023



---

[5] Consolidation Report, April 2023. Office of the Accountant General.

Si wax looga qabto arrimaha xaaladdan abuuraya, loona helo nidaam adag, waara, oo canshuur ururineed, Soomaaliya waa in ay hirgalisaa tabo kor loogu qaadayo u hoggaansanka sharciga, lagu hannaaninayo maamulka canshuuraha, laguna raadgoobayo ilo kale oo dhaqaale. Dadaallada lagu caraniyo kobaca dhaqaale, laguna kordhinayo maalgashiga ayaa la arkaa in ay gacan ka geystaan sare u kaca dakhliga canshuuraha.

3. Casharrada Dakhli Abuurista Gudaha ee Dalal kale laga Baran karo[6]

Sanduuq 1:

Waxaa jira tusaalayaal caalami ah, oo ay Soomaaliya kaga dayan karto kor u qaadista canshuur ururinteeda, gaar ahaan Rwanda, Georgia, Gambia, iyo Laybeeriya.

Ruwanda: Xasuuqii cagta mariyey dhaqaalaha iyo tolnimada bulshada ka dib, Ruwanda waxa ay dibuhabeyn ku samaysay nidaamka canshuuraha. Waxa ay abuurtay Laanta Canshuuraadka, waxaanay bilowday canshuurta dulsaarka ah (VAT), si ay u beddesho canshuurta iibka, waxa kale oo ay hirgalisay canshuur cusub 4%, oo sannadle ah. Waxa sida oo kale meesha laga saaray sharciyo canshuur dhaaf oo badan. Dowladda Ruwanda, ayaa sida oo kale dibuhabeyn ku samaysay habraacyada canshuur ururinta, iyada oo wanaajisay tayada shaqaalaha iyo maareynta macluumaadka, waxaanay bilowday olole wacyigalin dadweyne iyo ka qeybgalinta daneeyayaasha, si ay muwaadhiniintu ugu lug yeeshaan kor u qaadista miisaaniyad sannadeedka. Sannadihii u dhexeeyey 2010 illaa 2015, Ruwanda waxa ay keentay diiwaangalin elektaroonig ah, nidaam dhiteeya oo diiwaangaliya lacag bixinta, nidaam otomaatig ah oo canshuureed iyo kastamka canshuuraha qaada iyo hal nidaam oo qaada canshuurta ganacsiga caalamiga ah. Waxa ay sida oo kale kordhisay canshuurta qalabka dhismaha ee dibadda laga keeno iyo canshuurta laga qaado ku hadalka telefoonka gacanta, taas oo gaadhay 10% halka ay hore u ahayd 5%. Tallaabooyinkan dibuhabeynta canshuuruhu waxa ay dakhliga dalka gudihiisa kor u qaadeen 3.5%.

Georgia: Ka hor 2004, Joorjiya(Georgia) waxa ay lahayd habab canshuur ururineed oo liita, waxaana xaalufiyey musuqmaasuq baahsan. Laakiin kolkii ay dowladda cusubi la wareegtay talada dalka, waxa ay bilowday isbeddello qotodheer oo ay kor ugu qaadayso dakhliga gudaha iyo canshuuraha,kuna daboolayso baahida dhaqaale ee dalka.

Wajiga koowaad: waxa uu ku bilowday la dagaallanka musuqmaasuqa iyo xidhidda dad caan ah oo musuqmaasuq ku eedaysnaa. Waxaa meesha laga saaray faragalintii aan loo baahnayn ee ay dowladdu ku samayn jirtay ganacsiga, waxaana hoos loo dhigay qiimaha canshuurta dulsaarka ah (VAT). Canshuurtaasi waxa ay ahayd 20%, waxaana laga dhigay 17%, iyada oo la hoos geeyey laanta canshuuraha ee wasaaradda maaliyadda.

---

[6] Jorge Martinez-Vazquez, 2022. Successful Tax Reforms in the Recent International Experience: Lessons in Polical Economy the Nuts and Bolts of Increasing Country Tax Revenue Effort. https://www.adb.org/sites/default/files/institutional-document/782851/ado2022bp-tax-reforms-experience-lessons.pdf

Wajiga labaad: waxa uu diiradda saaray fududaynta xeerka canshuurta iyo balaadhinta bahaheeda, iyada oo la yareeyey jaadadkeeda. Canshuurta laga qaado shirkadaha oo horay u ahayd 20%, waxaa lagu jaangooyey 15%. Canshuuraha mushaaraadka shaqsiga laga jaro waxaa laga dhigay 20% – taas oo u dhiganta canshuurta laga qaado canshuur bixiyayaasha kale oo dhan.

Wajiga saddexaad: waxa uu keenay nidaam elektarooni ah oo lagu diiwaangaliyo canshuur bixiyaha. Nidaamkani, waxa uu sare u qaaday u hoggaansanaanta sharciga, waxaanu yareeyey xatooyada/baadiqariska canshuurta, isaga oo horay u mariyey kaabayaasha kastamyada.

Wajiga afraad: wajigan oo ah ka ugu dambeeya, ayaa hirgaliyey hannaan-sharciyeed dhowrsan oo lagu xakamaynayo canshuuraha, kaas oo la waafajiyey hababka caalamiga ah, si loo yareeyo kharashka ku baxa hubinta iyo u hoggaansanaanta sharciga. Taasi waxa ay dhashay in uu dakhliga canshuuruhu cirka isku shareero, oo uu dakhliga guud ee dalka ka noqdo 23.2%, halka uu horay uga ahaa 7.6%.

Laybeeriya: Sannadkii 2003, ayay Laybeeriya soo saartay sharci sahlan, kaas oo dibuhabeyn ku sameeyey qiimaha canshuuraha kastamyada, agabka dalka la keeno, badeecooyinka iyo adeegyada. Tallaabadani waxa ay balaadhisay canshuur ururinta, waxaanay dalka soo galisay dakhli badan. Waxa kale oo ay bilowday nidaam elektaroonig ah oo lagu soo xaraynayo canshuuraha, kaas oo canshuur bixinta dhib yareeyey, dhimayna fursadaha musuqmaasuqa. Dibuhabeyntani, waxa ay keentay in dakhliga canshuurta 2003 uu ka karaar qaato 10%, gaadhana 25%.

Gaambiya: Dalkan aadka u yar, dhibaatooyin maaliyadeed ayaa soo foodsaaray ka dib xiisadihii dhaqaale ee 2008. Deynta shisheeyaha ayaa cirka isku shareertay, taas oo keentay sicir barar, dulsaarkii oo kor u kacay iyo sarrifka lacagaha qalaad oo kordhay. Kolkaas, waxa ay dowladdu ku qasbanaatay in ay dibuhabeyn ku samayso siyaasadaha canshuuraha, si ay u kordhiso dakhliga gudaha, ugana maaranto kaalmooyinka shisheeyaha. 2013, waxa ay sida oo kale dowladdu ku dhaqaaqday barnaamijyo dibuhabayneed, iyada oo diiradda saartay canshuuraha dadban iyo hagaajinta maamulka canshuuraha. Canshuurta iibka ayaa lagu beddelay midda dulsaarka oo laga dhigay 15%, halka adeegyada isgaadhsiintana la canshuuray 18%. Waxa canshuur dheeraad ah lagu soo rogay tubaakada, iyada oo canshuurta sigaarka la kordhiyay 25%. Si dakhliga kor loogu qaado, waxa la tirtiray canshuur dhaafkii loo samayn jiray shidaalka. Hay'adda dakhligu, waxa ay hagaajisay awoodaheeda maamulka, iyada oo wanaajisay u hoggaansanaanta sharciga iyo nidaamka hantidhawrka. Tallaabooyinkaas ka dib, sida uu sheegay Sanduuqa Lacagta Adduunku, canshuurtu waxa ay dakhliga guud ee dalka ka noqotay 17.5%, halka ay horay u ahayd 13%.

Iyada oo laga duulayo guulaha kor ku xusan ee ku salaysan dibuhabaynta canshuuraha, kuma jiro hal nooc oo la odhan karo wuu ku habboon yahay cid kasta,marka la dajinayo siyaasadaha canshuuraha si loo kobciyo wax soo saarka dakhliga. Tusaale ahaan, Rwanda waxa ay hirgalisay dibuhabayno canshuureed, iyada oo xoogga saartay kordhinta xaddiga canshuuraha asaasiga ah ee kala duwan, halka ay Georgia qaadatay hannaan fududaynaya nidaamka canshuuraheeda, iyada, iyada oo hoos u dhigtay xaddiga canshuuraha, meeshana ka saartay labajeer canshuurka. Mar haddii ay Soomaaliya ku jirto xaalad ay baahi weyn u qabto kordhinta dakhliga canshuuraha, si u maalgaliso baahiyaheeda horumarka, waxa waajib ku ah in maammulladu u halgamaan isu dheellitirka xaddiga canshuuraha iyo xaqiijinta isku-fillaanshaha canshuur ururinta. Tani, waxa ay muhiimad weyn siinaysaa ka hortagga caqabadaha daran ee ku xeeran canshuurbixiyayaasha iyo in laga fogaado saamayn kasta oo taban oo ay ku yeelan karto dhaqaalaha Soomaaliya.

4. Dibuhabeynta Dakhliga ee ay Soomaaliya Dhowaan samaysay

Jaantuska 3aad



1. Sharciga dakhliga waxaa la sameeyey 2019, si loo maammulo dakhli ururinta
2. Xeerka kastamyada waxa dib loo eegay 2020
3. JFS, waxa ay badeecada iyo adeegyada ku soo rogtay canshuur dhan 5% kolka la soo dejiyo iyo canshuur iib oo laga qaado huteellada, tigidhada iyo biyaha la cabbo
4. Keenidda foomka caddeynta oo elektaroonig ah
5. Dhaqangalinta lambarrada aqoonsiga canshuurta iyo shahaadooyinka u hoggaansanaanta canshuurta
6. Qaaddida khidmadaha shatiga ee shirkadaha isgaadhsiinta
7. Khidmadda dal ku galka iyo ogolaanshaha shaqo oo otomaatik laga dhigay.

5. Caqabadaha ku Xeeran Kor u Qaadista Dakhliga Gudaha

Xaaladaha dhaqaale oo aan si sax ah u shaqaynin ayaa dowladda ka hortaagan in ay soo saarto dakhliga karaankeeda ugu sarreeya. Dhaqaalaha Soomaaliya, waxa uu caan ku yahay waaxyo aan rasmi ahayn oo ay adag tahay in la canshuuro.[7] Tusaale ahaan, way adag tahay in la xakameeyo u hoggaansanaan la'aanta sharci ee ay ku kacaan ganacsiyada yaryar, kuwa aan rasmiga ahayn iyo ganacsiga beeralaydu, maxaa yeelay war iyo wacaal toonna lagama hayo dakhliga soo gala. Heerka shaqada aan rasmiga ahayn iyo shaqooyinka naftii-dabbarka, ayaa wali ka mid ah kuwa ugu badan adduunka.[8] Dhaqaalaha aan rasmiga ahayn xooggiisu, waxa uu ka yimaaddaa waxsoosaarka dakhliga iyo fursadaha shaqo ee ay u abuurto dadka shaqo la'aanta ah. Sidaa awgeed, dakhliga ka soo xerooda canshuurta hantida iyo raasamaalka ganacsiga aan rasmiga ahayni, si gaar ah ayay aad ugu hooseeyaan (arag shaxda).

> *Dhaqaalaha aan rasmiga ahayn ee baaxadda leh, kaas oo ka kooban shaqaalaha iyo shirkadaha ku shaqeeya si ka baxsan sharciga iyo nidaamka maamulka, ayaa caqabad weyn ku ah ballaadhinta canshuuraha iyo ururintooda tooska ah, taasina waxa ay dhalisaa caqabado dhaqaale oo kala duwan*

Dhaqaalaha aan rasmiga ahayn ee baaxadda leh, kaas oo ka kooban shaqaalaha iyo shirkadaha ku shaqeeya si ka baxsan sharciga iyo nidaamka maamulka, ayaa caqabad weyn ku ah ballaadhinta canshuuraha iyo ururintooda tooska ah, taasina waxa ay dhalisaa caqabado dhaqaale oo kala duwan**.** Shirkadaha aan rasmiga ahayni ma aha kaliya kuwo aan canshuur laga qaadin, balse sida oo kale waa kuwo aan wax soo saar fiican lahayn, oo aan daryeelin shaqaalaha. Waa in dadaal xoog leh lagu bixiyo sidii loo diiwaangalin lahaa shirkadaha aan rasmiga ahayn, si canshuurta loo ballaadhiyo, il dakhli oo cusubna loo abuuro.

Arrinta kale ee muhiimka ahi waa maqnaanta maammul maaliyadeed oo isku dubbadhacsan, gaar ahaan, dhinaca dakhli ururinta.[9] Haatan, heerarka kala duwan ee dowladda – dowladda dhexe, dowlad goboleedyada iyo dowladaha hoose – dhammaan canshuurta way qaadaan. Tafaraaruqa ka dhex jira canshuur qaaddidda waxaa u sabab ah dastuurka kumeelgaadhka ah oo aan caddaynin awoodaha canshuur qaaddida ee ay kala leeyihiin heerarka kale duwan ee dowladdu. Qodobka 50(f)[10] waxa uu leeyahay "masuuliyadda dakhli ururintu waxa ay saaran tahay hadba heerka dowladeed ee ay u badan tahay in uu dakhligaa gaarka ah sida ugu wacan u ururin karo." Tani waxa ay leedahay saamayno muhiim ah: way adag tahay in canshuurta la qaadaa, haddii ay jiraan nidaamyo kala duwan oo canshuur ururineed, taasina waxa ay keentaa in canshuurtii lala dhuunto, dakhli badanna uu halkaa ku baylaho.

---

[7] AFDB, 2018. Somalia Country Note. https://www.afdb.org/fileadmin/uploads/afdb/Documents/Generic-Documents/country_notes/Somalia_country_note.pdf

[8] Karamba,R. Wendy, 2021. Improving Access to Jobs for the Poor and Vulnerable in Somalia (English). Washington, D.C. : World Bank Group. https://documents.worldbank.org/en/publication/documents-reports/documentdetail/540261609935995160/improving-access-to-jobs-for-the-poor-and-vulnerable-in-somalia

[9] HIPS, 2022. Somalia's External Debt Relief: Pursuing Economic Reforms Beyond HIPC Initiative. https://heritageinstitute.org/somalias-external-debt-relief-pursuing-economic-reforms-beyond-hipc-initiative/publications/

[10] Provisional Constitution of the Federal Republic of Somalia.

> *Federaalaynta nidaamka maaliyadda sida qeybsiga kheyraadka iyo dakhli ururinta ayey madaxda dowladda dhexe iyo kuwa dowlad goboleedyadu sannadihii dambe aad uga hadleen*

Federaalaynta nidaamka maaliyadda sida qeybsiga kheyraadka iyo dakhli ururinta ayey madaxda dowladda dhexe iyo kuwa dowlad goboleedyadu sannadihii dambe aad uga hadleen. Shirkii wadatashiga ee ay dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyadu yeesheen, marka laga reebo Puntland, waxa ay isku raaceen jadwal qeexaya masuuliyadda ururinta noocyada kala duwan ee canshuuraha. Heshiiskan taariikhiga ahi waxa uu u baahan yahay in laga dhigo wadar-ogol, laga qeybgaliyo Puntland iyo daneeyayaasha kale, inta aanu sharci noqon. Fadhiisinta awoodda ururinta dakhli sannadeedka dowladda ayaa muhiim u ah kobcinta dakhliga.

Heshiiska maaliyadeed oo ah mid itaal darran, oo heec ah, ayaa caqabad ku ah kobcinta dakhliga gudaha. Sida ay qabto fikradda Levi (1988) ee loo yaqaan "Of Rule and Revenue", heshiis maaliyadeedka sannadlaha ahi, waxa uu u baahan yahay xidhiidh laba geesood ah oo u dhexeeya dowladda iyo shacabkeeda, kaas oo sahlaya u hoggaansanaanta sharciga, si loo fuliyo balanqaadyada canshuurta, dowladduna u bixiso addeegyada ay bulshadu u baahan tahay.[11] Canshuur ururinta iyo adeegyada bulshadu, waa ay is xoojiyaan. Heshiis maaliyadeedka Soomaaliya ma aha mid wacan, maxaa yeelay heerarka kala duwan ee dowladdu ma bixiyaan adeegyadii loo baahnaa. Soomaali badani waxayba u arkaan in canshuurta ay bixiyaan ay dhiirrigalinayso musuqmaasuqa iyo in ay saraakiisha dowladdu ku takrifalaan xoolaha dadweynaha. Dowladda dhexe iyo kuwa ka hooseeyaa toonna dadaal ma galiyaan adeegyada bulshada ee daruuriga ah, taas oo loo qaadan karo in aanay u dhaqmin sidii kuwo xil ka saaran yahay canshuur bixiyayaasha. Mararka qaarkood, adeegyadii ay bulshadu xaqa u lahayd ayaa laga iibiyaa. Hufnaan la'aanta iyo jabinta sharciga canshuurahu, waxa ay lagama maarmaan ka dhigayaan in laga shaqeeyo sidii loo dhiirrigalin lahaa canshuur bixin ikhtiyaari ah. Laakiin tani ma suuragalayso haddii aanay bulshadu helin adeegyada ay u baahan tahay.

> *In kasta oo ay dowladdu wacad ku martay in ay la dagaallamayso musuqaasuqa iyo xatooyada xoolaha dadweynaha, iyada oo xidhay saraakiil caan ah qaarna ku kalliftay in ay dalka ka cararaan*

Musuqmaasuqa baahsan ee ay galaan canshuur ururiyayaashu ayaa ah caqabadda ugu weyn ee hortaagan kobcinta dakhliga gudaha. Musuqmaasuqa dakhliga guduhu, waxa uu u dhacaa siyaabo kala duwan. Kow; saraakiisha dowladdu xoolaha dadweynaha ayey xadaan, halkii ay uga isticmaali lahaayeen adeegyada bulshada. Labo, laaluush ayey qaataan kuwa loo xilsaaray in ay canshuurta ka soo ururiyaan ganacsatada iyo canshuur bixiyayaasha kale, taas oo sahasha in canshuurta la lunsado.[12] Tani, waxa ay si gaar ah ugu baahsan tahay soo saaridda dakhliga berriga, kaas oo aan lahayn nidaam habaysan oo lagu fashilin karo kuwa canshuurta lunsada. In kasta oo ay dowladdu wacad ku martay in ay la dagaallamayso musuqaasuqa iyo xatooyada xoolaha dadweynaha, iyada oo xidhay saraakiil caan ah qaarna ku kalliftay in ay dalka ka cararaan[13], haddana sharci baahsan oo la gula dagaallamo musuqmaasuqa iyo hay'ado xooggan, iyo sida oo kale wacyigalin iyo fulin sharci ayaa lama huraan ah.

---

[11] Levi, M. (1988). Of rule and revenue. Univ of California Press.

[12] HIPS interview, 2023

[13] Hiiraan, June 2023. High-ranking Somali officials arrested in pivotal step towards national anti-corruption efforts. https://www.hiiraan.com/news4/2023/Jun/191715/high_ranking_somali_official_arrested_in_pivotal_step_towards_national_anti_corruption_efforts.aspx

Dakhliga kooban ee aan dheellitirnayn ayaa ka mid ah caqabadaha kala gaabiyey dakhliga gudaha. Sida ay sheegtay warbixin uu dhowaan soo saaray Bangiga Adduunku, canshuurta Soomaaliya uga soo ururta ganacsiga waa 7%, halka ay in badan oo ka tirsan dalalka Saxare-xigeeenka Afrika dakhligooda ganacsigu celcelis ahaan ka hooseeyo 12.2%.[14] Canshuurta shirkadaha iyo kuwa shaqsiga ah, ayaan weli si buuxda loogu darin qeybaha kala duwan ee waaxda ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo shirkadaha caalamiga ah; in kasta oo ay dowladdu sannadkii 2017 ku dartay shabakadda canshuuraha.[15] Dhaqangalinta canshuuraha shaqsiyaadka, ayaa ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee Soomaaliya haysta, iyada oo sida oo kale weheliyaan hoos u dhac maaliyadeed iyo caqabado waaweyn oo dhanka horumarka curyaamiyey.

Soomaaliya, waxa ay la daalaadhacaysaa/udulufaysaa karti xumo xagga maammulka canshuuraha ka haysata. In kasta oo ay dowladda dhexe iyo qaar ka mid ah dowlad goboleedyadu dibuhabeyn muhiim ah ku sameeyeen maammulka dakhliga, kaas oo ay gundhig u tahay hirgalinta Nidaamka Maaraynta Maaliyadda Isgaadhsiinta (FMIS). Canshuuraha, waxa maammul xumida ugu wacan, waxaan jirin kaabayaashii loo baahnaa iyo tiknooloji fiican.Dakhli -ururinta kastamyada iyo berrigu, waxa ay si weyn ugu tiirsan yihiin hannaan gaboobay oo gacan-maal ah. Waxa ay u badan tahay in nidaamkan duugga ahi, suuragalinayo musuqmaasuq iyo in canshuurta la lunsado. Sida ku cad sanduuq koowaad ee ku suntan waayo-aragnimada u kala gooshta dalalka, dibuhabenyta canshuuruhu, waxa ay u baahan tahay u hoggaansanka sharciga iyo la dagaallanka musuqmaasuqa canshuuraha la xidhiidha, si loo kordhiyo dakhliga. Shaqaalaha haatan ka shaqeeya canshuurahu ma laha xirafadihii iyo kartidii loo baahnaa, taas oo qudheedu dhaawacaysa kordhinta dakhliga gudaha. Meelaha ay xirfad xumadu ka jirto waxa ka mid ah: xeeldheerayaasha tignoolajiyadda, xisaabiyayaasha, qareennada iyo kormeerayaasha.[16] Shaqaalaynta shaqaalaha rayadka ahi kuma dhisna karti iyo hufnaan, waxaana saameyn weyn ku leh siyaasadda iyo qaraabo-kiilka; sidaa awgeed ma laha xirfaddii iyo aqoontii looga baahnaa maammulka dakhliga dalka. Xallinta mushkiladaha la xidhiidha shaqada iyo shaqaalaha waxa ay u baahan tahay tabo dhinacyo badan taabanaya; kuwaas oo ay ka mid yihiin shaqaalaysiin ku dhisan karti iyo hufnaan, barnaamijyo lagu kobcinayo karaanka shaqaalaha iyo mushaaraad wanaagsan, oo la siiyo shaqaalaha dakhliga ururiya.

---

14. World Bank Report, 2021. Domestic Revenue Mobilization for Somalia. https://documents1.worldbank.org/curated/en/121391596804622057/pdf/Domestic-Resource-Mobilization-in-Somalia.pdf
15. Ibid.
16. HIPS interview, 2023.

6. Waaritaanka Maaliyadda iyo Saamaynta ay ku Leedahay Teegeero-miisaaniyadeedka Shisheeyuhu

Soomaaliya, waxa ay ku tiirsanaan jirtay kaalmada dibadda sida deeqaha, deymaha iyo gargaarka farsamada iyo maalgashiga. Tobankii sano ee ka dambeeyey xornimada, Soomaaliya waxa ay ahayd dalka hela gargaarka la siiyo Afrika oo dhan kan ugu badan, waxayna heli jirtay $90 qofkiiba.[17] Taageerada maalgashiga mashaariicda ayaa xilligaas ahayd kaalmada dhaqaale ee ugu badan. Soomaaliya, waxa ay weli sidii ugu tiirsan tahay gargaarka ay ka hesho hay'adaha caanka ku ah deeqbixinta iyo kuwo aan ku ahaynba. Hay'adahan qaarkood toos ayey Soomaaliya kaalmada u siiyaan, qaarkoodna waxa ay u soo mariyaan dhabbooyin caalami ah. Horraantii 1980, Soomaaliya waxa ay xubin ka ahayd Barnaamijka Dibuhabeynta Qaabdhismeedka Waddamada Dunida Saddexaad ee Sanduuqa Lacagta Adduunka iyo Bangiga Adduunka, si loo xasiliyo dhaqaalaha guud. Laakiin ka dib markii ay dowladdii dhexe burburtay 1991, dagaal sokeeye oo uu waheliso cunto yari ka dhalatay abaaro dalka aafeeyey, waxaa is dhimay kaalmadii horumarinta ee dibadda ka iman jirtay, balse waxaa si xoog leh u socday faragalinta bani'aadanimo.

> “ *kharashaadka dowladda ee hadda jira, ayaa ah kuwa aan wax soo saar lahayn, maadaama oo inta badan lagu bixiyo waxyaalo soo noqnoqda oo ay ka mid yihiin amniga iyo mushaaraadka shaqaalaha dowladda, iyada oo aan ahmiyad gaar ah la siinnin kaabayaasha guud ee dhaqaalaha*

Ka dib markii ay samaysay isbeddelo dhaqaale oo muuqda, Soomaaliya waxa ay heshay taageero miisaaniyadeed oo ay ka heshay saaxiibbo caalami ah sida Turkiga, Sacuudi Careebiya, Bangiga Adduunka iyo Midowga Yurub. Sida ay caddaysay Wasaaradda Maaliyaddu, Soomaaliya waxa ay sannaddkii 2015 heshay taageero-miisaaniyadeed oo ka kooban deeq iyo mashaariic, taas oo dhammayd $26.9 malyuun, halka ay 2021 ka heshay $695.0 malyuun.[18] Taageero-miisaaniyadeedda mashaariicda iyo deequhu waxa ay miisaaniyad-sannadeedka guud ee DFS ka yihiin 73%. Sida oo kale kharashaadka dowladda ee hadda jira, ayaa ah kuwa aan wax soo saar lahayn, maadaama oo inta badan lagu bixiyo waxyaalo soo noqnoqda oo ay ka mid yihiin amniga iyo mushaaraadka shaqaalaha dowladda, iyada oo aan ahmiyad gaar ah la siinnin kaabayaasha guud ee dhaqaalaha.[19] Tani, waxa ay keentay welwel weyn oo laga qabo joogtaynta miisaaniyadda dalka, gaar ahaan; ka dib markii ay dowladdu gaadho heerka dhammaystirka deyn cafinta, gargaarkana lagu beddello deyn.[20]

---

[17] Laitin, D. D., & Samatar, S. S. (1984). Somalia and the world economy. Review of African Political Economy, 11(30), 58-72.

[18] Budget Appropriation Act. Ministry of Finance, Federal Government of Somalia.

[19] HIPS, 2022. Somalia's External Debt Relief: Pursuing Economic Reforms Beyond HIPC Initiative. https://heritageinstitute.org/somalias-external-debt-relief-pursuing-economic-reforms-beyond-hipc-initiative/publications/

[20] Ibid.

“In kasta oo deeqaha dibaddu ay gacan ka geysteen geeddi-socodka dowlad dhiska, gaar ahaan dhaqaalaha lagu bixiyo amniga iyo adeegyada muhiimka ah ee bulshada, sida waxbarashada iyo caafimaadka, haddana waxa ay keeneen in dowladihii kala dambeeyey ay is dhigtaan, oo aanay kor u qaadin dakhliga gudaha laga dhaliyo

In kasta oo deeqaha dibaddu ay gacan ka geysteen geeddi-socodka dowlad dhiska, gaar ahaan dhaqaalaha lagu bixiyo amniga iyo adeegyada muhiimka ah ee bulshada, sida waxbarashada iyo caafimaadka, haddana waxa ay keeneen in dowladihii kala dambeeyey ay is dhigtaan, oo aanay kor u qaadin dakhliga gudaha laga dhaliyo. Khubarada dhaqaaluhu waxa ay si weyn u faaqideen cawaaqib xumada ka dhalata ku tiirsanaanta gargaarka, iyaga oo ku dooday in ku tiirsanaanta taagerada dibaddu ay dhaqaalaha dalka wiiqdo ama ay ka dhigto waxa ay ugu yeedhaan “dowlad heeco ah” oo ku tiirsan dakhli hal nooc ah “rentier state.”

Marka la eego dabeecadaha qalafsan ee isbedbeddelka gargaarka dibadda, waxa uu hoos u dhac kasta oo ku yimaaddaa si daran u saameynayaa degganaanshaha dakhliga sannadlaha ah.[21] Kaalmo dhaqaale, oo badan oo dibadda ka timaaddaa waxa ay keentaa cawaaqib xun oo dhaqaalaha guud la soo darista, gaar ahaan, haddii ay weheliso hoos u dhac maaliyadeed. Go’aannada siyaasiga ah ee deeqbixiyayaashu waxa ay keeni karaan hoos u dhac ku yimaadda gargaarka. Arrintani waxa ay si gaar ah u soo shaacbaxday xilliggii doorashadii 2022, markii deeq bixiyayaasha badankoodu u hakiyeen taageero-miisaaniyadeedkii xiisado siyaasadeed oo ka dhashay dibudhaca doorashada, taas oo keentay culays maaliyadeed daran.

Waddamada sida daran ugu tiirsan taageerada deeqbixiyayaashu, xoogga ma saaraan siyaasadaha canshuurta, mana xoojiyaan dakhliga ka soo xerooda gudaha.[22] Taageerada deeqbixiyayaashu waxa ay lid ku tahay isku-tashiga dowladda iyo shacabka, waxaanay wiiqdaa isla xisaabtanka dowladda. Waddanka Ghana ayey ka muuqataa dhibaatada isla xisaabtan la’aanta ee la xidhiidha taageero-miisaaniyadeedka ay bixiyaan deeqbixiyayaashu, iyada oo dowladda lagu qasbay in ay raalligaliso deeqbixiyayaashii, halkii ay ku mashquuli lahayd raalligalinta muwaadhiniinta.[23]

Marka laga fiiriyo dhanka miisaaniyadda, waxa ay u muuqataa in Soomaaliya ku sii tiirsanaan doonto taageero-miisaaniyeedka shisheeyaha, iyada oo la saadaalinayo in hoos u dhaca miisaaniyad-sannadeedka dakhliga guud ee guduhu gaadho 1.2% sannadka 2024, ka dibna uu kor ugu soo kaco 1.4% sannadka 2025.[24] Waxa la filayaa in uu dakhliga guduhu si joogto ah u noqdo 3%, marka loo eego dakhliga waxsoosaarka guud ee dalka, halka laga saadaalinayo in ay deeqaha debeddu hoos uga soo dhacaan 4.4%, islamarkaana noqdaan 2.0%, marka loo eego dakhliga waxsoosaarka guud ee dalka.[25]

---

[21] Moss, T. J., & Subramanian, A. (2005). After the Big Push? Fiscal and institutional implications of large aid increases. Center for Global Development working paper, (71).

[22] Kaldor, N. (1963). Taxation for economic development. The Journal of Modern African Studies, 1(1), 7-23.

[23] Tony Killick, 2005. The politics of Ghana’s Budgetary System. https://cdn.odi.org/media/documents/1963.pdf

[24] Federal Government of Somalia, IMF, and World Bank staff estimates.

[25] Ibid.

Falanqayntan ayaa xaqiiqo cad ku tilmaamaysa in karaanka miisaaniyadda Soomaaliya u badan yahay mid aan joogtaysmi karin muddada dhow iyo ta fogba. Marka laga duulo qaacidada ku salaysan dakhliga gudaha ee hooseeya iyo hoos u dhaca ku imanaya deeqaha debedda-HIPC kadib, waxa laga yaabaa in dalku miisaaniyaddiisa ku maalgaliyo lacag u soo daynsado. Tani, waxay ku baaqaysaa in la dajiyo qaab-dhismeed maaliyadeed oo wax ku ool ah, kaas oo ay taageerayaan xeerarka miisaaniyadda iyo qawaaniinta kharashaadku, iyo sida oo kale istaraatiijiyad lagu maaraynayo deynta.

Dhaqangalinta xeerarka kharashaadka iyo kuwa miisaaniyaddu waxa ay dowladda ka caawin doonaan macquulaynta qarashaadkeeda iyo tirtiridda kharashaadka aan dheefta lahayn, iyada oo si gaar ah loo tixgalinayo in hannaanka miisaaniyadeed ee hadda jirtaa si weyn diiradda u saarayo kharashaadka soo noqnoqda. Abuuridda iyo hirgalinta istaraatiijadda maaraynta daymaha ayaa sida oo kale muhiim ah si loo dhiso qaab-dhismeed maaliyadeed xooggan oo kal-dhexaad lagu kaaftoomo. Tan, waxa lagu ladhi karaa hay'ado xooggan, daahfurnaan iyo nidaam islaxisaabtan, kaas oo si cad u qeexaya cidda wax soo daynsanaysa, waxa la soo daynsanayo iyo sababta loo soo daynsanayo.

7. Talabixinno Siyaasadeed

Waa in la sameeyo qaacido maaliyadeed oo federaal ah oo loo dhan-yahay, taas oo leh hannaan sharci oo cad iyo dakhli ururin hufan. In kasta oo horumar fiican laga sameeyey xagga siyaasadda iyo sharciga dakhli kobcinta, haddana weli dastuurka laguma darin hannaan canshuur ururineed, oo ka duulaya heerarka kala duwan ee dowladda. Heshiiskii dakhli-wadaagga ee ay soo saareen Golaha Wadatashiga Qaranku, waa bilow fiican (Puntland, heshiiskan qayb kama ahayn), laakiin waxaa loo baahan yahay wadar-ogol cad oo ay qayb ka yihiin dhammaan dhinacyada siyaasaddu, inta aan dastuurka lagu darin. Waxa sida oo kale lama huraan ah in la sameeyo qaab-dhismeed sharci iyo siyaasad la jaanqaadi karta nidaamka federaalka ee maanta dalka ka jira. Soomaaliya weli waxa ay istcimaashaa xeerar canshuureed oo duug ah, kuwaas oo aan ka tarjumaynin xaqiiqada dhaqaale ee dalka hadda ka jirta.

Ilaha dakhliga Soomaaliya waa in la ballaadhiyo. Dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyaduba, waa in ay ku dadaalaan sidii ay dalka gudihiisa uga soo ururin lahayeen dakhli ku filan maalgalinta ajandayaasha horumarinta qaranka. Tallaabooyinkan soo socda ayaa la qaadi karaa, si loo ballaadhiyo ilaha canshuuraha dalka:

i) Abuuridda nidaam-canshuureed oo gebi ahaanba cusub, sida kan dulsaarka (VAT), taas oo beddesha midda haatan jirta ee iibka. Canshuurta dulsaarku (VAT) waa mid wax-ku-ool ah, korna u qaadaysa dakhliga waddamada saxare-xigeenka Afrika, waxaanay noqon kartaa hab lagu kobciyo dakhliga gudaha.

ii) Qiimaha canshuurta kastamyada oo la gala mid dhigo midka waddamada ku bahoobay Suuqa Guud ee Bariga iyo Koonfur-galbeed Afrika (COMESA), kaas oo celcelis ahaan noqonaya 12.2%. Soomaaliya, waxa ay qaaddaa canshuur qiimiheedu yahay 7% . La simidda canshuurtan midda waddamada dariska, ahi waxa ay dalka soo galin kartaa dakhli dheeri ah.

iii) In xoogga la saaro kordhinta canshuurta laga qaado agabka raaxada iyo tubaakada; ayaa si dhib yar loo sameyn karaa. Arrintani waxa ay noqon kartaa mid loo aayo, maadaama oo maamulka canshuuruhu si degdeg ah u soo xeraynayaan dakhliga canshuuraha, iyada oo aan wax badan laga beddellin nidaam-canshuureedka hadda jira. Dowladdu, waxa ay canshuur cusub ku soo rogi kartaa isgaadhsiinta, sida ku hadalka teleefanka iyo lacagaha hawada la iskaga dalwiyo/diro.

iv) Diiwaangalinta kumanaan ganacsi oo ay ka mid yihiin kuwa yaryari, si loo canshuuro. Caqabadaha jira waxa ka mid ah dhaqaalaha dalka oo aan caadi ahayn, kaas oo adkeeya canshuur ururinta, maxaa yeelay ganacsiyada aan diiwaangashanayn iyo ashkhaastuba waxa ay la dhuuntaan canshuurta. In si sax ah canshuurta looga soo ururiyo shirkadaha iyo ashkhaasta ayaa qayb weyn ka noqonaysa kor u qaadista dakhliga.

In la xoojiyo maamulka canshuuraha, si hufanna loo aabaabulo dakhliga gudaha. Xirfadaynta maamulka canshuuraha iyo abuuridda hay'ado sal balaadhan ayaa udub dhexaad u ah dibuhabeynta canshuuraha. Saddex tallaabo oo muhiim ah ayaa loo baahan yahay in la qaado:

i) In la sameeyo hay'ad madaxbannaan oo dakhli, si ay u maammusho canshuuraha iyo dakhliga. Howshan, waxa hadda maamusha Wasaaradda Maaliyadda. Tani waxa ay hay'adda dakhliga ka xijaabaysaa faragalin siyaasadeed, waxaanay xaqiijinaysaa in la helo maammul hufan.

ii) In nidaamka bixinta iyo qabasahda canshuuraha laga dhigo otomaatig,si loo xoojiyo dakhliga gudaha ka soo xerooda, waxa muhiim ah in tiknoolojiga la isticmaalo, islamarkaana elektaroonig laga dhigo gabi ahaanba nidaamka canshuuraha, si loo xakameeyo musuqmaasuqa, korna loogu qaado u hoggaansanaanta sharciga canshuuraha.

iii) Waxa muhiin ah in la helo shaqaale tayo leh oo ka shaqeeya maamulka dhakhliga. Horumarinta tayada shaqaalahu waxa ay gacan weyn ka gaysan kartaa hufnaanta hannaanka canshuuraha iyo la dagallaanka musuqmaasuqa.

Go'aanno siyaasadeed oo aasaasi ah, oo gaadhsiisan dhammaan heerarka kale duwan ee dowladda ayaa loo baahan yahay. Way adkaanaysaa, in la meelmariyo dibuhabeynta siyaasadda canshuurah,a haddii aan dowladda dhexe, dowlad goboleedyada iyo dowladaha hoose ku hoggamin nidaam siyaasadeed oo tayo leh. waa in ay dowladda dhexe, dowlad goboleedyada, dowlaha hoose, golaha shacabka, waaxda garsoorka, booliiska iyo hay'adaha sharcigu si wadajir ah uga shaqeeyaan dibuhabeynta canshuuraha iyo abaabulka dakhliga.

Waa lama huraan in la gaadho heshiis-maaliyadeed si canshuur ururinta iyo dakhli abuurka loo kobciyo. Soomaali badan ayaa aamminsan in ay canshuurtu tahay baad ay dowladdu qaaddo. Mid ka mid ah jidadka lagu heli karo heshiis maaliyadeed iyo u hoggaansanaan sharci oo canshuureed, ayaa ah in la bilaabo wada-hadal buuxa oo lala yeesho canshuur-bixiyayaasha, ganacsatada, bulshada rayidka ah iyo daneeyayaasha kale ee muhiim ka ah. Dowladdu, waa in ay sida oo kale bixisaa adeegyada daruuriga ah, sida waxbarashada iyo caafimaadka, si loo bogaadiyo u hoggaansanaanta ikhtiyaariga ah. Waayo-aragnimada laga helay dalalka kale, ayaa muujinaysaa in ka qaybgalinta joogtada ah iyo wadahadallada daneeyayaashu caawiyaan xoojinta dakhliga gudaha.

Ugu dambeyn, waa in ay dowladdu dagaal ku qaaddo musuqmaasuqa dakhliga iyo guud ahaan musuqmaasuqa ka jira dalka. In kasta oo ay dowladda dhexe, dhowaan qaadday tallaabooyin xooggan, sida xidhidda shaqaale dowladeed oo la soo bandhigay iyo maxkamdayn lagu fuliyay dad ku eedaysan musuqmaasuq, haddana waxa muhiim ah in la dajiyo hannaan sharci oo la gula dagaallamayo musuqmaasuqa.

HERITAGE

INSTITUTE

The Heritage Institute for Policy Studies
http://www.heritageinstitute.org